Ireland

An Roinn Dlí agus Cirt,
Gnóthaí Baile agus Imirce
Department of Justice,
Home Affairs and Migration

euaa
EUROPEAN UNION
AGENCY FOR ASYLUM

# XUQUUQDAADA IYO WAAJIBAADKAAGA SOO-DHAWEYNTA



**Macluumaadkan adiga ayaa laguugu talagalay haddii:**

- aad tahay qof weyn (kaweyn 18 sano jir)
- aad codsatay magangalyo caalami ah (sidoo kale loo yaqaan magan-galyo) gudaha Ireland oo imika aad tahay codsade magangalyo caalami ah.

SOMALI

# TUSMADA

Waa maxay soo-dhaweyn? 3

Maxaad heli doontaa? 6

Xuquuqda daryeel caafimaad 9

Xuquuqda waxbarasho ee carruurta 11

Xuquuqda shaqo 12

Casharada luuqada iyo tababarka farsamada gacanta 13

Dhukumentigani wuxuu sheegayaa inaad tahay codsade magangalyo caalami ah 14

Halkee ayaad joogi doontaa? 14

Shuruudaha codsadaha lagu xidhi karo 18

Waa maxay waajibaadkaaga soo dhaweynta? 19

Maxaa dhacaya haddii aanad u hogaansamin waajibaadkaaga? 20

Maxaa dhacaya haddii aad u safartid waddan EU+ ah oo kale bilaa fasaxa masuuliyiinta? 21

Maxaa dhacaya marka dib laguugu celiyo dalka kale oo ka tirsan EU+ waddan ah oo aad ka tagtay bilaa fasax? 21

Waxaad ka qaadan kartaa rafcaan maamulka 22

Waxaad heli kartaa caawimo sharci 23

Faahfaahinta meelaha lagala xidhiidhi karo 24

## WAA MAXAY SOO-DHAWEYN?

Soo-dhaweyn waa taageerada aad heshid codsade ahaan inta aad sugaysid in masuuliyiintu soo gabogabeeyaan baadhitaanka codsigaaga magangalyada caalamiga ah. Waxa kujira xuquuqaha iyo waajibaadka lagu sharxay buug yarahan.

Gudaha **Ireland,** Hay'adda mas'uulka ka ah soo dhawaynta waa **Adeegga Hoyga Ilaalinta Caalamiga ah (IPAS ).** Hay'adda mas'uulka ka ah baaritaanka codsigaaga magangalyada waa **Xafiiska Ilaalinta Caalamiga ah (IPO).**

Waxaa lagaa codsan doonaa inaad xaqiijiso inaad heshay macluumaadka ku jira buug-yarahan adoo adeegsanaya akoonkaaga elektaroonigga ah ee ku yaal Bogga Ilaalinta Caalamiga ah. Weydii shaqaalaha Xafiiska Ilaalinta Caalamiga ah su'aalo haddii wax aan caddayn.



**Waad ku badqabtaa wadankan.**

Inta lagu jiro joogitaankaaga, shaqaalaha Adeegga Hoyga Ilaalinta Caalamiga ah ayaa kusoo ogeysiin doona adeeggyada
soo-dhaweynta iyo caawimada kuu diyaar ah oo kuxidhan xaaladaada.



Waxaad weydiin kartaa haayadaha kale macluumaadka iyo caawimada bilaash ah. Waxaad ka heli kartaa liiska haayadaha dhammaadka buug yarahan.



**Turjumaan** ayaa kaa caawin doona inaad la xidhiidhid shaqaalaha luuqad fudud oo aad fahmaysid, markay daruuri tahay. Turjumaanku lama wadaagi doono shay aad tiraahdid cid kasta oo kale.

**Waxaad ka heli kartaa macluumaadka nidaamka magangalyada iyo shuruucda la raacayo buuga kale oo gaara.**

**Adigu waxaad imika Ireland kaasoo ah waddan ka tirsan EU+. Waddamada EU+ waa:**

- 27 ka Dowladdood ee Xubnaha ka ah Midowga Yurub (EU): Austria, Belgium, Bulgaria, Croatia, Cyprus, Czechia, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Hungary, Italy, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Poland, Portugal, Republic of Ireland, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden iyo
- 4 waddan oo kale: Iceland, Liechtenstein, Norway, Switzerland.

## Fiiro gaar ah!

Codsadayaashu waxay leeyihiin xuquuqo iyo waajibaad soo-dhaweyn oo isku mid ah dhammaan waddamada EU+ ah.

Shuruucdani waxay khuseeyaan codsashada magangalyo iyo u safrida waddamada EU+ ee kale.

- **Waa inaad ka diiwaangelisaa codsiga magangelyo wadanka EU+ ee ugu horreeyay ee aad timid,** haddii maasuliyiintu aanay kuu sheegin wax kale.
- **Kaliya hal waddan oo EU+ ah ayaa ka masuul ah inuu baadho codsigaaga magangalyo.** Masuuliyiinta gudaha Ireland ayaa raaci doona nidaamka si loo go'aamiyo in wadan EU+ ah kamasuul yahay codsigaaga mangan-galyo.
- **Waa inaad joogtaa** Ireland **Uma safri kartid wadan EU+ oo kale bilaa fasaxa masuuliyiinta.** Haddii aad tagtid, waxa jiri doona cawaaqib xun. Codsigaaga mangan-galyo ee Ireland waa la joojin karaa. Xuquuqdaada dhaqdhaqaaqa dalka kale ayaa la xaddidi karaa oo adeeggyada soo-dhaweynta ayaa la joojin karaa.

## MAXAAD HELI DOONTAA?

Inkastoo maamulku baadho codsigaaga magangalyo caalami ah, iyadoo ay ku xidhan tahay xaaladaada shakhsi iyo dhaqaale, waxaad heli doontaa:



- hoy



- agabka nadaafada gaarka ah



- cunto



- dhar





- lacag aad u isticmaasho kharashaadka maalinlaha ah

masuuliyiintu Adeegga Hoyga Ilaalinta Caalamiga ah waxay ku weydiin doonaan su'aalo si ay si fiican ugu fahmaan duruufahaaga shakhsi iyo dhaqaale.

## Waxaad xaq u leedahay inaad hesho taageero gaar ah haddii aad leedahay baahiyo gaar ah.







**Wargali shaqaalahaaga haddii:**

- aad dhaawacan tahay ama xanuunsanayso
- aad uur leedahay ama aad u malaynayso inaad uur leedahay
- ay kuu sugan yihiin xubno qoyskaaga ka mid ah oo u baahan caawimo gaar ah
- aad qabto naafanimo (tusaale ahaan, dhaqdhaqaaq xaddidan, maqalka oo daciif ah, ama aragga oo liita)
- aad si joogto u dareento cadho badan, welwelsan tahay ama walaacsan tahay, seexan weydo ama aad waajahayso fikirro xun
- aad la ildaran tahay dhibaato ama jirdil hore
- aad dareento inaanad ammaan ahayn, dhibtoonayso ama aad ka baqayso qof, ha ahaado qof ajnabi ah ama qof aad taqaan
- lagugu qasbay ama lagugu qasbayo inaad samayso waxyaabo aadan rabin
- aad dareento inaanad badqabin sababtoo ah diintaada, qofka aad jeceshahay, sida aad u labisato ama u dhaqanto
- aad ka yar tahay 18 jir, oo aadna timid adigoon la socon waalidkaa kaligaa ama waxaad la socotay xubno kale oo qoyskaaga ah.

Taageerada gaarka ah kaliya waxa lasiin karaa marka shaqaaluhu ogyihiin baahiyahaaga gaarka ah.





Shaqaalaha gaarka ah ayaa ku weydiin doona weydiiyay
su'aalo si ay:

- u qiimeeyaan **baahiyahaaga gaarka ah**
- u aqoonsadaan **nooca taageerada gaarka ah** ee kugu habboon.

Tan waxa loo yaqaanaa **qiimaynta adeegyada gaarka ah**

Turjumaan ayaa kaa caawin doonaa inuu kugula xidhiidho luuqad aad fahmayso, haddii ay daruuri tahay.



**Had iyo jeer la xidhiidh shaqaalaha** haddii aad u baahan tahay taageero gaar ah.

Waxaad aamini kartaa shaqaalaha gaarka ah oo si xoriyad ah ula hadal iyaga. Dhammaan macluumaadka waa la asturi doonaa, taasoo macneheedu tahay lalama wadaagi doono dadka kale iyadoon lagaala heshiin.

Kaliya waxa ka reeban marka noloshaada ama nolosha qof kale ay halis ku jirto.

# XUQUUQDA DARYEEL CAAFIMAAD

Mas'uuliyiintu waxay hubin doonaan inaad hesho daryeelka caafimaad ee lagama maarmaanka ah.

Tani waxaa ka mid noqon kara:



- ballan aad la yeelato kalkaaliye caafimaad ama dhakhtar
- daaweynta dhaawaca ama xanuunka
- daryeelka haddii aad xanuun qabto ama aad dareemayso inaadan fiicnayn
- helitaanka daawooyinka aad u baahan tahay
- taageero loogu talagalay walaacyada degdegga ah ee caafimaadka dhimirka
- u gudbinta adeegyada kale ee caafimaadka haddii loo baahdo.



**Markaad Timaato**

Markaad Timaato, shaqaalaha Hay'adda Caafimaadka (HSE) ayaa ku weydiin kara su'aalo ku saabsan caafimaadkaaga.

Waxay ku weydiin karaan:

dhaawac kasta, xanuun, ama dhibaatooyin caafimaad oo degdeg ah

xaalado caafimaad oo aad qabto

daawooyin kasta oo aad hadda qaadanayso

taariikhda tallaalkaaga

cudurro dhawaan dhacay ama kuwo halis ah.

**Macluumaadkani wuxuu ka caawiyaa HSE inay aqoonsato baahiyaha caafimaad ee degdegga ah iyo inay sida ugu dhakhsaha badan u diyaariso daaweynta.**

# XUQUUQDA DARYEEL CAAFIMAAD



**Haddii aad u Baahan Tahay Gargaar Caafimaad oo Degdeg ah**

Haddii aad qabto xanuun daran ama dhaawac oo aad u baahan tahay daaweyn caafimaad oo degdeg ah, wac 112 ama 999 oo weydiiso ambalaas.

Lambarradan gurmadka degdegga ah waa bilaash in la waco.

**Helitaanka Daryeelka Caafimaadka iyo Taageerada**

Haddii aad u baahan tahay talo caafimaad ama talo caafimaad, la hadal shaqaalaha Xarunta Hoygaaga.

Waxa kale oo aad wici kartaa **HSELive** bilaash ah **1800 700 700** oo aad weydiisan kartaa faahfaahinta xiriirka **Kooxda Caafimaadka Muhaajiriinta** HSE ee deegaanka.

HSE Live - we're here to help

**Bixinta Adeegyada Caafimaadka**

Adeegyada caafimaadka qaarkood waa bilaash qof walba. Tan waxaa ka mid ah adeegyada dhalmada (daryeelka xilliga uurka iyo dhalmada) iyo adeegyada tallaalka.

Waxaa laga yaabaa inaad bixiso adeegyo caafimaad oo kale haddii aadan haysan kaarka caafimaadka.

Waxaad ka heli kartaa foomka si aad u codsato kaarka caafimaadka:

- online
- Xafiisyada Caafimaadka Deegaanka
- shaqaalaha Xaruntaada Hoyga, ama
- Kooxda Caafimaadka Soogalootiga HSE ee deegaankaaga.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo helo kaararka caafimaadka, eeg Su'aalaha Badiya La Weydiiyo.

# XUQUUQDA WAXBARASHO EE CARRUURTA

Dhammaan carruurta, wiilasha iyo gabdhaha, kayar 18 sano jir waxay xaq u leeyihiin waxbarashada.

Waxay heli doonaan taageero ay ka mid yihiin fasallada luuqadda Fadlan weydii xubin ka tirsan shaqaalaha Xarunta Hoygaaga haddii aad rabto inaad ka faa'iidaysato adeegyadan. Taageerooyinka waxaa sidoo kale laga heli karaa Kooxda Isdhexgalka Maamulka Deegaanka..




Dalka Ireland, dhammaan carruurta da'doodu u dhaxayso 6 ilaa 16 sano waa inay dhigtaan iskuul.

**Waalidiinta waxa waajib ku ah inay carruurtooda dugsiga u diraan.**

# XUQUUQDA SHAQO

Iyadoo ku xidhan xaaladaada, waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay inaad shaqayso kadib 6 bilood laga bilaabo diiwaangelinta codsigaaga ilaalinta caalamiga ah ee gudaha Ireland

shaqaalaha Xarunta Soo Dhaweynta ee Citywest ayaa kugu wargalin doona waxyaabaha ku saabsan sharciga ku habboon Ireland

Waxaad sidoo kale ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan Helitaanka Suuqa Shaqada halkan: [Ogolaanshaha Helitaanka Suuqa Shaqada - Bixinta Adeegga Socdaalka]



Halkan waxaa jira qaar ka mid ah ka reebista, tusaale ahaan, laguma oggolaan doono inaad shaqeyso haddii aadan la shaqeynin maamulka

Haddii aad shaqeyso oo aad ku nooshahay Xarunta Hoyga IPAS, waxaa laga yaabaa in lagu weydiiyo inaad ka qayb qaadato kharashka hoygaaga. Xaq u yeelashadaada gunnada kharashka maalinlaha ah waxaa sidoo kale hubiya Waaxda Ilaalinta Bulshada.



Dhammaan wiilasha iyo gabdhaha da'doodu ka yar tahay 14 sano looma ogola inay shaqeeyaan. Dalka Ireland, da'da ugu yar ee lagu shaqayn karo waa 14 (shaqo fudud oo ka baxsan dugsiga), laakiin carruurta da'doodu ka yar tahay 16 sano ma qaban karaan shaqooyin waqti-buuxa ah oo joogto ah. Dhallinyarada da'doodu tahay 16 iyo 17 sano waxay shaqayn karaan waqti-buuxa laakiin waxay ku xiran yihiin xayiraado sharci oo adag oo ku saabsan saacadaha, nasashada, iyo waqtiyada nasashada maalinlaha ah, toddobaadlaha ah, iyo habeenkii.

## KOORASYADA LUUQADA IYO TABABARKA XIRFADAHA

Iyadoo ku xidhan xaaladdaada, Waxaad kasoo qeybgali kartaa:

- koorasyada luuqada,
- koorasyo ku saabsan bulshada aad la nooshahay (shuruucda, xeerarka, iyo dhaqanka)
- koorasyo aad ku baranayso xirfado cusub (tababarka xirfadaha).



Shaqaaluhu waxay ku wargelin doonaan koorsooyinkan iyo goorta aad bilaabi karto.

## DHUKUMENTIGA CADDEYNAYA INAAD TAHAY CODSADE ILAALINTA CAALAMIGA AH



Waxaad heli doontaa dukumenti rasmi ah oo dijitaal ah , oo loo yaqaan Kaarka Codsadaha Ilaalinta Caalamiga ah oo sheegaya inaad tahay codsade magangalyo caalami ah. Dukumentigan wuxuu sheegi doonaa magacaaga iyo xogtaada shakhsi ahaaneed waxaana lagu kaydin karaa taleefankaaga . Waa inaad mar walba la socotaa

Kani ma'aha dhokumanti aad ku safri karto.

**Fiiro gaar ah!** Ka taxaddar inaadan lumin oo ha siin qof kale.

## HALKEE AYAAD JOOGI DOONTAA?

Mas'uuliyiinta Adeegga Hoyga Ilaalinta Caalamiga ah ayaa kuu sheegi doona meesha aad joogi doonto waxayna kuu sharxi doonaan shuruudaha, adeegyada iyo taageerada aad heli karto.

Meesha aad joogi doonto inta codsigaaga Ilaalinta Caalamiga ah la baarayo waxay ku xiran tahay arrimo badan.

Haddii aad ku nooshahay hoyga IPAS, waxaa lagu siin doonaa nuqul ka mid ah xeerarka guriga, kuwaas oo ay tahay inaad raacdo inta aad ku jirto hoyga IPAS. Haddii aadan raacin xeerarka guriga waxaa laga yaabaa inaad lumiso hoygaaga ama laguu wareejiyo meel kale.

**Meel kasta oo aad joogtid, waxaad xaq u leedahay inaad:**



- **badqabto:** qofna, xataa shaqaalaha, looma oggola inuu kuu hanjabo, caayo, ama dhibaateeyo.



- codsigaaga inaad la joogto ninkaaga, xaaskaaga, carruurtaada iyo walaalahaaga ka yar 18 sano ama qaraabo qaangaar ah oo u baahan daryeel maalinle ah inta aad sugeyso go'aan ku saabsan codsigaaga magangalyada iyo haddii ay habboon tahay



- hesho caawimaad si aad **ula xidhiidhid** qoyskaaga **oo aadna isku deydo inaad raadiso iyaga, haddii aadan garanayn meesha ay joogaan**.

**Waxaad soo gudbin kartaa cabasho rasmi ah haddii aad aaminsan tahay in:**



- Mid ka mid ah shaqaalaha uu ku hanjabay, ku aflagaadeeyay, ama ku waxyeelleeyay.
- waxaad cabasho afka ah u gudbisay maamulaha xaruntaada, **iyo**
- waxaad cabasho qoraal ah u gudbisay maamulaha xaruntaada, iyo
- Kuma qanacsanid natiijada ka soo baxda cabashooyinka afka iyo qoraalka labadaba.

Habka Cabashada ee Adeegga Hoyga Caalamiga ah ee Ilaalinta (IPAS)

Mar walba waad weydiin kartaa maamulka, hay'adaha aan dowliga ahayn ama Xafiiska Qaxootiga ee Qaramada Midoobay (UNHCR) si aad u hesho macluumaad dheeri ah.

Waad dooran kartaa inaad ku hoyato guri gaar ah haddii aad haysato ilo dhaqaale oo ku filan iyo haddii maamulku aanay go'aamin inaad joogto hoy gaar ah. Xaaladdan, waxaa sidoo kale laguu oggolaan karaa inaad la joogto qoyskaaga ama asxaabtaada.

Haddii aad doorato inaad ku noolaato hoy gaar ah, waxaad sii wadi doontaa inaad hesho adeegyada caafimaadka iyo waxbarashada ee caadiga ah, laakiin ma jiri doonto caawimo dhaqaale oo la bixin doono.



**Iyadoo ku xiran xaaladdaada, masuuliyiinta laga yaabaa inay go'aamiyaan inaad joogto goob gaar ah (tusaale ahaan xarun soo dhawayn oo gaar ah).**



**Waxaa laguu oggolaan doonaa inaad ka baxdo meeshaas gaarka ah iyadoo la raacayo xaddidaadyo gaar ah. Joogitaankaaga meeshaas gaarka ah laga yaabaa in si joogoto ah loo hubiyo.**

Maamulku waxay go'aamin karaan sababo dhawr ah. Tusaale ahaan:

- waxaa jirta khatar ah inaad baxsato
- dalka kale ayaa laga yaabaa inuu masuul ka noqdo baadhista codsigaaga magangalyo, waxaana masuuliyiintu u arkaan inaad baxsato
- waxaad ka tagtay dalkaas adigoon oggolaansho haysan, waa lagugu soo celiyey, waxaana jirta khatar ah inaad mar kale baxsato.

**Maamulka waxay kugula soo wadaagi doonaan go'aankan hab qoraal ah oo ku qoran luuqad aad fahmayso. Waxay kuu sheegi doonaan xuquuqdaada, waajibaadkaaga iyo cawaaqib xumada ka dhalan karta haddii aadan ixtiraamin go’aanka.**

Waxaad ka qaadan kartaa racfaan go'aankan.

Waxaad weydiin kartaa maamulka haddii aad meel kale ku nagaato muddo xaddidan. Masuuliyiintu waxay ansixin karaan codsigaaga ama ma oggolaan karaan. Haddii codsigaaga la diido, waad racfaan ka qaadan kartaa go’aankan.

**Fiiro gaar ah!** Haddii aadan ixtiraamin go’aanka ku saabsan inaad ku nagaato meeshaas gaarka ah iyo xaddidaadaha lagugu soo rogay, isla markaana ay jirto khatar ah inaad mar kale baxsato, waa laguu xiri karaa.

## SHURUUDAHA CODSADE LAGU XIDHI KARO

Xadhig macneheedu waa in lagu geeyo xarun gaara oo aanad si xor ah u socon karin. Masuuliyiintu waa inay haystaan sabab sax ah oo ay kugu xidhaan. Waa inay hubiyaan in aan xalkale macquul ah laheyn xaaladaada. Maamulka ayaa tixgalin doona xaaladaada gaarka ah kahor go'aaminta.



Sababaha laguu xidhaayo waxay noqon karaan, tusaale ahaan:

- qodobbada muhiimka ah ee codsigaaga magangalyo (tusaale, aqoonsigaaga) lama xaqiijin karo adigoon lagu hayn.
- maad ixtiraamin waajibaadka inaad joogtid goob gaara, waxaana jirta halis inaad baxsatid markale iyo masuuliyiinta oo aan kulasoo xidhiidhi karin
- waxaad heshay go'aan in laguu gudbiyo wadan kale oo EU+ ah kana masuula baadhista codsigaaga magan-galyo waxaana jirta khatar inaad baxsato ah kahor gudbinta
- waxaad keenaysaa halis amni.

haddii lagu xidho, waxaad qaadan kartaa racfaan. Waxaad codsan kartaa caawimo sharci oo bilaasha iyo matalaad.

# WAA MAXAY WAAJIBAADKAAGA SOO DHAWEYNTA?





**Hoos waxa ah qaar kamida waajibaadka ay tahay inaad u hogaansantid.**

- ✓ Raac shuruucda wadankan.
- ✓ Joog Ireland oo ha u safrin dal kale oo EU + ah ama Boqortooyada Midowday (oo ay ku jirto Waqooyiga Ireland) adigoon helin oggolaanshaha maamulka.
- ✗ Ha ka bixin ogolaansho la'aan goobta juqraafiyeed ama goob gaar ah taasoo maamulku ay dhaheen waa inaad joogtaa.
- ✓ Si dhammaystiran ula shaqee maamulka oo raac tilmaamahooda.
- ✓ Ixtiraam sharciyada goobta aad joogto.
- ✓ Ixtiraam dadka kale ee kula degan, shaqaalaha iyo shaqsiyaadka kale.
- ✓ Ku wargali maamulka Xafiiska Ilaalinta Caalamiga waxyaabaha ku saabsan khayraadka maaliyadeed.
- ✓ Ku wargali maamulka waxyaabaha ku saabsan cinwaankaaga hadda iyo macluumaadkaaga halka lagala soo xidhiidhayo (lambarka taleefanka, iimaylka), iyo wixii isbeddel ah, si ay mar walba kuula soo xidhiidhi karaan.

## MAXAA DHACAYA HADDII AANAD U HOGAANSAMIN WAAJIBAADKAAGA?

Maamulka waxay qiimeyn doonaan xaaladdaada waxaana laga yaabaa inay go'aamiyaan in la dhimo ama la joojiyo nooc ka mid ah taageerada. Maamulka waxay kuugu soo gudbin doonaan go'aankaas qoraal ahaan waxayna caddeyn doonaan taageerada ay dhimayaan ama joojinayaan.




### Fiiro gaar ah!

**Waxaad heli kartaa taageero yar**, tusaale ahaan, haddii:

- aad ka baxdid ogolaansho la'aan goobta juqraafiyeed ama goob gaar ah taasoo maamulku ay dhaheen waa inaad joogtaa.
- aanad la shaqeyn maamulka
- aad ka been sheegtid meelaha dhaqaale kaasoo galo

- aad jabisid shuruucda goobta aad joogtid
- aanad kaqeybgalin casharada waajibka ah
- aad marhoreba codsatay magangalyada waddan EU+ oo kale waanad ka tagtay wadankaasi.

**Waxaad waayi kartaa caawimada aad helaysid** ihaddii aad noqotid rabshadle, haddii aad u hanjabtid dadka kale ama haddii aad jabisid sharciga goobta aad adigu joogtid markasta ama si darran. Xaaladani, booliiska ayaa sidoo kale la wici karaa si ay u farogaliyaan.



## MAXAA DHACAYA HADDII AAD U SAFARTID WADDAN EU+ OO KALE BILAA FASAXA MASUULIYIINTA?




**Gudaha Ireland**:

- habraacaaga magangalyo doon waxaa laga yaabaa in la joojiyo.

**wadanka EU+ ee aad u safartay bilaa fasax:**

- masuuliyiintu waxay go'aansan karaan inay kugusoo celiyaan wadanka aad ka tagtay bilaa fasax

Laga bilaabo marka maamulku kugusoo wargeliyaan go'aanka lagu celinayo, waxaad waayi doontaa xuquuqaha qaarkood, tusaale ahaan:

- ma heli **doontid adeeggyo badan iyo noocyo taageerada ah**
- laguuma **oggolaan doono inaad ka shaqayso**
- laguuma **oggolaan doono inaad kaqeybgashid koorasyada luuqada ama casharo lagu barto xirfado cusub.**

## MAXAA DHACAYA MARKA DIB LAGUUGUSOO CELIYO DALKA KALE OO KA TIRSAN EU+ WADDAN AH OO AAD KA TAGTAY BILAA FASAX?



Masuuliyiinta ayaa go'aamin kara inaad xaq u leedahay inaad joogtid goob gaara oo joogitaankaaga ayaa loo hubin doonaa si joogto ah. Waxaad awoodi doontaa inaad ka baxdo meeshaas iyadoo la raacayo xaddidaadyo gaar ah.

# WAXAAD KA QAADAN KARTAA RAFCAAN GO'AANKA MAAMULKA



Haddii masuuliyiintu go'aamiyaan inay xaddidaan xuquuqdaada codsade ahaan oo aad aamisan tahay in tani tahay cadaallad daro, **waxaad ka qaadan kartaa rafcaan go'aanka**.

Waxaad ka qaadan kartaa rafcaan haddii maamulka ay go'aamiyaan:

- uma lihid xaq hoy iyo caawimo soo-dhaweyn kale
- si loo yareeyo ama loo joojiyo caawimada soo-dhaweynta ee lagu siiyey
- inaan la ansixin codsigaaga inaad ka yara baxdid goob gaara ama goob gaara
- waxa kugu waajib ah inaad joogtid goob gaara (tusaale ahaan xarun soo-dhaweyn oo gaara) oo waxaad ku bixi kartaa xannibaado kooban
- si laguu xidho

Mas'uuliyiinta go'aanka gaaraya waxay bixin karaan macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan habka racfaanka ee khuseeya. Iyada oo ku xidhan nooca xayiraadaha la soo rogay, waxaad racfaan ka qaadan kartaa go'aanka Xafiiska Ilaalinta Caalamiga ah (IPO), Maxkamadda Racfaanka Magangelyada iyo Soo Celinta (TARA) ama Maxkamadda Degmada.

Haddii aad u safartay waddan EU+ oo kale bilaa fasaxa masuuliyiinta oo aad wayday xuquuqo soo-dhaweyn gaara halkaasi, waxaad kaga qaadan kartaa rafcaan go'aankan dalkaasi.

Haddii masuuliyiinta Xafiiska Ilaalinta Caalamiga ah ] ee Ireland go'aamiyaan inay yareeyaan ama joojiyaan caawimada soo dhaweynta ee lagu siiyey sababtoo ah xaalado lagu sharxay bogga 19 waxaad leedahay xuquuqo gaara. Tusaale ahaan, waxaad awoodi doontaa inaad la kulantid dhakhtar ama kalkaaliye, inaad heshod kaalmo caafimaad, waxoogaa taageero ah iyo goob aad seexatid oo ay go'aamiyeen maamulku. Nooca caawimada waxay ku xidhnaan doontaa xaaladahaaga iyo baahiyahaaga gaarka ah.

Marka maamulka waddan EU+ oo aad u safartay bilaa fasax go'aamiyo inuu joojiyo caawimada soo-dhaweynta lagu siiyey, nooca caawimada aad wali heli doontaa waxay ku xidhnaan doontaa xaaladaada iyo baahiyahaaga gaarka ah.

## WAXAAD HELI KARTAA CAAWIMO SHARCI



Haddii aad rabto inaad racfaan ka qaadato go'aanka hay'adaha ee xaddidaya xuquuqdaada soo dhawaynta hortiisa garsoore, waxaad heli kartaa caawimo sharci oo bilaash ah iyo matalaad, iyadoo ku xiran xaaladdaada.

Tani macneheedu waa in lataliye sharci [*MS ayaa habeeneysa*] ku caawin doono. Lataliyayaasha ama looyarada sharci [*MS ayaa habeeneysa oona dooraneysa*]
ayaa ku siiya caawimo sharci kahor garsoore, difaaca danahaaga oo ka madaxbanaan maamulka iyo garsooraha.

Waxaad sidoo kale la tashan kartaa lataliye sharci ama looyar adigu aad isku qabto kharashkiisa.




Maamulka ayaa kusoo ogeysiin doona sida looga qaato rafcaan go'aanka

Waxaad markasta weydiin kartaa masuulyiinta, haayadaha aan dawliga ahayn ama UNHCR wixii macluumaad muhiima, oo ay kujiraan caawimada sharci iyo matalaada bilaashka ah.

# FAAHFAAHINTA HALKA LAGALA XIDHIIDHAYO

Haddii aad qabtid wax su'aala ama aad u baahan tahay taageero inta lagu jiro joogistaada, waxaad la hadli kartaa shaqaalaha ka tirsan:

| the reception authority | |
|---|---|
| An Roinn Dlí agus Cirt, Gnóthaí Baile agus Imirce<br>Department of Justice, Home Affairs and Migration | International Protection Accommodation Service<br>Department of Justice, Home Affairs and Migration<br>51 St Stephen's Green, Dublin 2, D02 HK52<br><br>Email: IPASinbox@justice.ie |

| other relevant authority | |
|---|---|
| An Oifig um Chosaint Idirnáisiúnta<br>International Protection Office | The International Protection Office<br>Department of Justice, Home Affairs and Migration<br><br>Website: https://ipo.irishimmigration.ie |

| other relevant authority | |
|---|---|
| tara | Tribunal for Asylum and Returns Appeals<br>6/7 Hanover Street East<br>Dublin 2, D02 W320<br><br>Website: www.asylumappeals.ie |

You can also contact these organisations, for questions related to:

## medical support



- In a medical emergency, call **999** or **112** and ask for an ambulance.
- For general healthcare support in your area, speak to staff at your **Accommodation Centre**.
- You can also call **HSELive** free on **1800 700 700**. They can provide the contact details for the **HSE Migrant Health Team** in your area.

## psychosocial support



- The **Irish Red Cross** provides mental health and wellbeing support for people seeking international protection. Visit their website here for more information.
- The **HSE Cork and Kerry** service (see here for information) offers on-line videos in Arabic and Farsi about:
    - Trauma and PTSD
    - Managing sleep problems
    - Anxiety
    - Other mental health concerns.
- To access HSE **Counselling in Primary Care (CIPC)**, speak to your GP (doctor) about a referral.
- The **Irish Refugee Council** provides information about organisations that support people seeking international protection in Ireland (see map).

## legal counselling, assistance and representation



Legal counselling will be made available to you at the Citywest Convention Centre at the Legal Aid Board Citywest Counselling Service.

You can apply for legal advice and representation (legal aid) from the Legal Aid Board at the Citywest Convention Centre or at one of these 3 Law Centres:

1. **Dublin:** Smithfield Law Centre
   (01) 646 9600
2. **Cork:** Popes Quay Law Centre
   087 945 1132
3. **Galway:** Galway Law & Family Mediation Centre
   091 568 467 / 01 646 9637

| **UNHCR (Haayada Qaxoontiga ee Qaramada Midoobay)**<br>waxay ilaalisaa danaha iyo xuquuqaha magangalyo doonka iyo qaxoontiga. | |
|---|---|
| <br> | Xafiiska UNHCR ee Ireland wuxuu ku yaal<br>Merrion House, Suite 4, 1-3 Lower Fitzwilliam Street, Dublin 2, Ireland<br><br>Website: https://help.unhcr.org/.<br>Email: iredu@unhcr.org<br>Phone (Protection Unit): +353 1 631 4613 |

| **Integration Support** | |
|---|---|
| Kooxaha Isdhexgalka Maamulka Deegaanka (LAITs) | Shaqaalaha xarunta hoygaaga ayaa kula xiriiri kara kooxda LAIT ee deegaanka<br>https://www.localgov.ie/lait-contact-details |

| **Support to return to your home country** | |
|---|---|
| Adeegga Soo Noqoshada Iskaa wax u qabso ah | voluntaryreturns@justice.ie |

Haddii aad leedahay xaalad caafimaad oo degdeg ah ama aad ku jirtid halis, waxaad wici kartaa lambarkan bilaash :

**gargaarka caafimaad ee degdega ah:** **112/999**

**booliska:** **112/999**

euaa
EUROPEAN UNION
AGENCY FOR ASYLUM

An Roinn Dlí agus Cirt,
Gnóthaí Baile agus Imirce
Department of Justice,
Home Affairs and Migration

Buug-yarahaan waxa loogu talagalay keliya ujeeddooyin macluumaad ah. Isagu ma abuuro xuquuq iyo waajibaad midna. Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa soo diyaarisay qaybta ugu weyn ee qoraalkan, waxaana EUAA oo keliya u oggolaan kara in la daabaco ama wax laga beddelo buug-yarahan, taas oo loogu talagalay dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub. EUAA mas’uul kama aha saxnaanta, nuxurka, dhammaystirka, sharcinimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay ku dareen dalalka xubnaha ka ah Midowga Yurub ama cid kale oo mas’uul ah. EUAA iyo cid u shaqaysa toona mas’uul kama aha sida loo adeegsan karo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Wakaalada Midowga Yurub ee Magangalyada, 2025